

142
(142)

QODOBKA 119-AAD

MAS'UULIYADDA MARKABLEYGA KA SAARAN

XUQUQDA BADMAAXA

1. Ka sokow bixinta mushaharooyinka, kharashka dhoofinta iyo waajibaadka heshiiska ee uu leeyahay badmaaxa, sida ku xusan heshiiska shaqada sharcigan, markabka isagoo sii marinayaa markableyga, hawlgeliyaha, kabtanka ama wakiilka rasmiga ah, wuxuu kaloo mas'uul ka noqonayaa kharajka xannaaneynta, caafimaadka, magdhawga jirrooyinka, dhaawaca ama geerida aan caadiga ahayn ee badmaaxa inta uu ka shaqeynaya markabka, sida ku xusan heshiiska shaqada ee uu la leeyahay markabka wata Calan Soomaaliyeed.

Haddii ay ku timaado geeri aan caadi ahayn ah oo mas'uul ka yahay markabku, wakiilka shakhsiga ee qofka dhintay wuxuu Maxkamadda qaabilsan ee ku taala Jamhuuriyadda kaga furan kara dacwad uu ku warsanayo magdhawga. Dacwooyinka ku saabsan magdhawga jirrada, dhaawac ama geerida, waa in lagu fura dacwadda muddo saddex sano(3) gudahood laga bilaabo taariikhda jirrada, dhaawaca ama geerida badmaaxa, haddii kale waa laga mamnuucayaa dac-

143
(141)

wadda, ~~Maxkamadaha~~ Jamhuuriyadda ma oggolaan karaan dacwad uu soo ooga muwaadin ama qof leh dhalasho shisheeyaha, haddii eysan Maxkammad Soomaaliyeed ku qancin in dalkaas shisheeye, isla xaaladahaas lagu oggol yahay in muwaadin ama qof leh dhalashada Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya ka furto dacwad la mid ah maxkamadaha dalkaas.

Haddii ay dhacdo jirro ama dhaawac inta loogu jiro heshiiska shaqada iyo shaqada markabka, xaqa badmaaxa ee helidda kharashka xarnaaneynta iyo daaweynta laguma xiri karo gefka ama khaladka ama ku dhaqanka sharci darrada loo shaqeeyaha.

Hase yeehsee loo shaqeeyaha mas'uul uma noqonaya shaqaalaha, xaaladaha markii uu shaqaaluhu leeyahay gefka ama ku dhaqanka sharci darrada ah, jirro uu shaqaaluhu isku oga markii uu saxiixay heshiiska ama qarinta kaska ee shaqaalaha jirradiisa ama haddii uu badmaaxu diiday baaris takhtareed ama uu keensaday shahaado takhtar isagoo isticmaalaya dariiqyo sharci darra ah ama kuwa aan habboonayn, kuwaasoo keenay in jiradda uu ka dawoonayo shaqaa-

144
(142)

luhu uu kordhay.

2. Mas'uuliyadda markabka oo la sii mariyey markableyga, hawlgeliyaha, kabtanka ama wakiilka rasmiga ah waxay ku kooban tahay jirro, dhaawac ama geeri aan caadi ahayn ee badmaaxa haddii la caddeeyo sababta jirrada, dhaawaca ama geerida aan caadiga ahayn ay dhacday taariikhda heshiiska shaqada gaar ahaan laga ogaado taariikhda uu badmaaxu isu xaadiriyeey markabka dushiisa daraadeed iyo taariikhda dhoofitaanka ee asalka ama ku tala galka marka uu dhoofayo tii hadba dhacday markii hore.

3. Haddii jirradu ama dhaawaca badmaaxa uu yahay mid muddo gaaban ah kana yimid si toos ah hawsha markabka wata Galan Soomaaliyeed, mushaharadiisa, kharajka caafimaadka iyo xannaaneynta (haddii uu ka duwan yahay kharashka caafimaadka ama haddii uusan fuushanayn markabka) iyo kharashyada kale ee ku dhacday jirrada ama dhaawaca, waxaa bixinaya markabka. Badmaaxa markii laga soo saaro takhtarka isagoo la soo daaweyey, lana siiyo shahaado muujinaysa in caafimaadkiisu taam yahay bilaabina kara

145
(142)

hawshiisa, waxaa lagu celinayaa markabkiisa ayadoo uu markabku bixinayo kharshkiisa, wuxuuna badmaaxu halkaa ka sii wadayaa hawshiisa sida ku qoran shuruudaha heshiiska shaqada ayadoo loo qaadanayo inaysan jirin wax kala go' ah xiriirka shaqada.

4. Badmaaxa haya hawshiisa sida ku qoran heshiiska shaqada la xiriira markabka wata Calan Soomaaliyeed wuxuu xaq u leeyahay in markabku ama markableygu uu siiyo kharashka daaweynta, daawooyinka, qalabka daaweynta, safarka, cuntada iyo jiifka iyo kharashka kasta oo kale oo la xiriira jirrada ama dhaawaca ka yimid shaqada laga bilaabo taariikhda ay bilaabatay jirrada ama dhacay dhaawaca ilaa la caddeeyo in badmaaxa uu buksaday ama la caddeeyo in jirrada ama karti la'aanta ay tahay mid joogta ah.

5. Markabka ama markableyga waxaa waajib ku ah inuu bixiyo kharajka duugitaanka badmaaxa, geeridiisa ku timid markabka dushiisa ama deked inta uu hayey hawshiisa ku saabsan markabka, haddii geeridaas ay dhacday inta u dhaxeysay muddada heshiiska shaqadiisa.

146
(144)

6. Wakiilka shaqsigaa ee shaqaalaha ama badmaaxa dhintay isagoo hawl ka hayey markab wata Calan Soomaaliyeed, kuna dacwoonaya inuu markabku gaarsiiyey geeri aan caadi ahayn ah ama geeri kaga timid jirro ka dhalatay shaqadiisa, wuxuu dacwad ku saabsan magdhaw kaga furan karaa Maxkamadda awooda u leh oo ku taala Jamhuuriyadda. Dacwooyinka aan la oogin muddo saddex (3) sano gudahooda laga bilaabo taariikhda geerida dhaawaca ama markii la ogaaday jirada ama la doonayey inuu ogaado dacwadaha, waa reeban yihiin.

Haddii la keeno caddeyn qancinaysa Maxkamadda in sababta geerida, jirrada ama dhaawac ay ahayd u qalimid la'aanta badmaridda ee markabka ama geeriga, ku dhaqanka sharci darrada ee Kabtankaa ama Sarkaal kale oo kaga hoos shaqeeya, shaqaalaha markabka ama Wakiilkiisa shakhsiyeed ee shaqaalaha dhintay wuxuu xaq u leeyahay, ka sokow kharaajka xamaanada, daaweynta iyo magdhawga kale ee ay Maxkamadaha Jamhuuriyadda u oggolaadaan kuna saabsan jirrada ama dhaawaca, inuu helo magdhaw ganaax ah oo u dhiganta lacag aan ka badnayn saddex laab kharaajka la caddeeyey.

213
(211)

- j). Haddii maraakiibta isku dhacday ay wada lahaayeen gefka, markabka lagu helo gefka intiisa badan, wuxuu mas'uul ka noqonayaa bixinta lacagta dogwooyinka la soo caddeeyey ee markabka kale, intii la xiriirta gefkaba galay markab kasta.
- x). Haddii ay dhacdo geeri ama dhaawac shakhsiyeed ayadoo aan la caddeyn karin gefka markabka ama mas'uuliyadda markab kasta dhammaan maraakiibta khuseeyey shilka ayaa la wada saarayaa wadajir ahaan iyo qeyb qeyb ahaan mas'uuliyadda geerida ama dhaawaca shakhsiyeed.

QAYBTA VI

KAALMADA IYO SAMATABIXINTA

QODOBKA 168-AAD

WAAJIBAADKA KAALMEYNTA IYO SAMATABIXINTA

1. Kabtanka markab kasta, marayaa badda ama u diyaar garo obaya gooshidda, waxaa sharciyan waajib uga saaran yahay inuu kaalmeeyo markab kasta oo uu ku ogaado inuu ku jiro dhibaato ama khatar, intii awoodiisa asggo aan dhibaato ama khatar gelineyn markabkiisa, shaqaalaha iyo rakaabka

fuushan haddii uusan ogaanin in kaalmada lagama maarmaanka ah ee uu u baahday markabka laga siinayo markab kale ee habboon.

2. Haddii markabka dhibaateysan uusan lahayn awood dhaq-dhaqaaq, kabtanka markabka kaalmeynaya isagoo aan dhibaato ama ~~khatar~~ u geysaneyn markabkiisa, shaqaalaha ama rakaabka fuushan, waa inuu isku dayaa inuu samatabixiyo markabka dhibaateysan isagoo badbaadinayaa dadka saaran markabkaas.

3. Kabtanka Markab kasta waxaa sharciyan waajib uga saaran yahay inuu u fidiyo kaalmo isagoo badbaadinaya dadka saaran markabka ama ku dhax daadsan badda halista u ah dhaawac ama geeri.

4. Kabtanka markab kasta wo u fidin waayey kaalmo maraakiibta ama dad ay haysato dhibaato ama ku jira khatar, ama uu isku dayi waayo samata bixinta ama badbaadinta, waxaa laga qaadayaa darajadiisa baddeed iyo buugga gooshidda, isagoo lagu ciqaabayo xarig aan ka badneyn lix (6)sano.

- 215
(213)

QODOBKA 169-AAD

MAGDHAW IYO ABAAL-MARIN

1. Kaalmada loo fidiyey iyo samata bixinta markab dhibaateysan oo uu Kabtanku markabka dhibaataysan uusan waxba ka qabin ama si toos ah u diidin, waxay xaq u siinaysa markabka fidiyey kaalmada ayadoo la tixgelinayo xadka qiimaha hantida la kaalmeeyey ama la badbaadiyey, inuu helo magdhaw khasaaraha ama dhibaatada gaartay markabka fidiyey kaalmada, si loogu celiyo ~~kharashka~~ uu galay iyo in la siiyo abaalmarin. Xuquuqdan waa in la fuliyaa xataa haddii isku dayga kaalmeeynta ama samatabixinta lagu guuleystay qayb ahaan keliya.
2. Maraakiibta jiidista ee heshiis lala galay, xaq uma laha magdhawidda hawlaha kaalmada iyo samatabixinta haddii aysan u geysan adeegyo aan caadi ahayn oo ka badan intii ku xusan shuruudaha heshiiska.
3. Lacagta adeegga samatabixinta ay fidiyeen ama loo fidiyey maraakiibta xataa haddii uu leeyahay isla qofkii, xaq baa lagu leeyahay.

216

(214)

QODOBKA 170-AAD

SALDHIGGA GOYNTA LACAGTA

1. Ayadoo la raacayo wixii lagu beddelo amar Maxkama--
deed sida uu dhigayo Qodobkan, dhinacyada ay saameyso dac--
wadda ku saabsan kaalmeynta iyo samatabixinta waxay ku
heshiin karaan goynta saldhigga iyo qaddarka lacagta
ee la siinayo.

2. Dhinaca codsanaya lacagta ku saabsan kaalmada ama
samatabixinta sida waafaqsan Qaybtan ama codsanaya waxka
beddelidda heshiiska lacagta ku saabsan kaalmeynta ama
samatabixinta wuxuu dacwad ka furan karaa Maxkamad ku
taal Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya.

Daawooyinkaas waa in la spo oogaa laba (2) sano
gudahaed laga bilaabo taariikhda hawlaha ay dhamaadeen
ama la dhaafay haddii kale dacwadda waa ka dhacaysa.

3. Lacagta xaqa loo leeyahay waxaa goynaysa Maxkamadda
ayadoo eegaysa dulucda dacwad kasta tixgelinaysana wax--
jaabaha soo socda:-

217
(213)

- b). Marka ugu horreysa, guusha la gaaray, dadaalka iyo faa'idada markabka samatabixiyey ama kaalmeeyey khatarta uu ku jiray markabka la samatabixiyey ama la kaalmeeyey, shaqaalaha, rakaabka iyo badeecadaha, khatarta uu galay markabka la samatabixiyey ama la kaalmeeyey iyo shaqaalihiisa, muddada iyo dadaalka la galay, kharashka iyo khasaaraha la galay iyo qiimaha hantida la badbaadiyey.
- t). Tan labaad, qiiraha hantida la badbaadiyey.
- j). Maxkammaddu way Jiidi karta lacagta ama way yareyn karta lacagta lagu soo da'wooday haddii la soo caddeeyey in Markabka samatabixiyey ama kaalmeeyey uu si khalad ah u kaalmeeyey ama samatabixiyey ama loogu helay dembi ku saabsan tuugo, khiyaamo, qarsaaho khiyaamo ama falal kale oo sharci darra ah.

4. Wax lacag ah loo siin maayo badbaadinta qof naftiisa, hase yeeshee haddii la badbaadiyey dadka naftooda ayadoo lagu jiray kaalmeynta ama samatabixin markab, badeeco, ama qalab, waa la oggolaanayaa lacagta ku saabsan markabka, badeecadaha, qalabka la badbaadiyey hase yeeshee lacag lagu siin maayo badbaadinta nafta bani-aadamka.

QODOBKA 171-AAD

HESHIISKA KAALMEYNTA AMA SAMATABIXINTA

1. Heshiis ku saabsan kaalmaada iyo samatabixinta oo la galay markii lagu jiray dhibaataada ama khatarta, ayadoo ay xaaladdu ahayd mid deg-deg-ah, heshiiskaas waa la burin kara ama la beddeli kara ayadoo arji loo qoortay Maxkamadda.
2. Maxkamaddu waxay amraya burinta ama beddelidda haddii ay la noqoto in lacagta ama abaalmarinta lagu heshiyey ay aad u badan tahay ama ay aad u yar tahay marka la fiiriyo khatarta la galay iyo adeegga la fidiyey.

219

(013)

QODOBKA 172-AAD

QAYBSASHADA LACAGTA, ABAALMARINTA

AMA WAAJIBAADKA

1. Abaalmarinta kaalmeynta ama samatabixinta waxaa qaybsanayaa qofka leh markabka kaalmeeya/iyo shaqaalaha ayadoo saddex meelood hal meel la siinayo markableyga, saddex meelood labo meelna la siinayo shaqaalaha haddii markabka aysan ku rakibnayn qalabka jiidista ama uusan caadi ahaan ku shaqa lahayn samatabixinta; Hase yeeshee saddex meelood laba meel oo la siin lahaa shaqaalaha waxaa loo qaybsanayaa, ayadoo la tixgelinayo mushaharka uu qaato shaqaalaha kasta iyo dadaal uu galay.
2. Abaalmarinta lagu siinayo kaalmeynta ama samatabixinta markabka kaalmeeyey, waxaa qaysanayaa dhammaan dhinacyada ay khuseyso oo ku shaqada leh markabka kaalmeeyey, qalabkiisa iyo badeecadaha sida waafaqsan nidaamka ku biirista khasaraha guud oo lagu sheegay sharcigan iyo xeer-nidamiyaha khuseya. Qaybsashada waajibkaadka waxaa lagu dabbaqayaa xataa haddii Kabtanka markabka uusan codsan kaalmada ama samatabixinta.

220

(220)

QODOBKA 173-AAD

KU DABBAQIDA NIDAAMKA MARAAKIIBTA

D A W L A D D A

Nidaamka lagu xusay Qaybtan waxaa lagu dabbaqayaa xataa maraakiibta dawladda ha ahaadeen kuwo bixinaya ama la siinayo kaalmada ama kuwo samatabixinaya ama la samatabixinayo.

QAYBTA VII

RAADINTA IYO SAMATABIXINTA MARAAKIIBTA

C A A R I Y E Y

QODOBKA 174-AAD

NIDAAMKA IYO XEER-NIDA/MIYAHA

1. Qaybtan waxaa lagu dabbaqayaa raadinta iyo samatabixinta maraakiibta caariyey iyo hanti kale ee ku daadatay ama loogaga tegay dhulka xeebaha ee dhinacyada kala duwan oo ay Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya awood badeed ku leedahay. Qaybtan ma saameynayso kaalmada ama samatabixinta maraakiibta ama dadka dhibaateysan ama ku

- 221
(219)

jira khatar ee lagu xusay meelaha kale ee sharcigan.

2. Wasiirka Kalluumaysiga & Gaadiidka Badda, wuxuu leeyahay awood uu ku soo saaro Xeer-nidaamiye haddii loo baahdo oo lagu ilaalinayo darta Jamhuuriyadda ayadoo la tixgelinayo duruuf gaar ahaaneed, oo ay ku jiraan aanse ku koobnayn samatabixinta iyo lahaanshaha waxyaabaha qiimo taariikheed u leh hidaha, qaranka, hanti qaali ah oo luntay ama hanti markii hore ay lahayd dawladdu

QODOBKA 175-AAD

SAMATABIXINTA IYO WAJIBAADKA SAMATA-

-B I X I Y A H A.

1. Ayadoo ay jiraan xuquuqda qofka iska leh hantida oo ku saabsan samatabixinteeda, haddii dad badan ay ku tala jiraan samatabixinta ama ku la'woodida xaqooda ku saabsan samatabixinta hantidaas, waxaa mu'naanta kowaad la siinayaa dadka marka ugu horreysa siiyey cagaysiiska ujeeddada samatabixinta Waaxda Badda. Hase yeeshee dadkaas waa inay bilaabaan hawshooda samatabixinta hal sano gudahisa laga bilaabo

222
(229)

maalinta la bixiyey ogeysiiska waxayna hawshooda wadana-
yaan ayadoo aan la joojin haddii la sii wadayo hal sano
kacbadan, markaasoo kale samatabixiyaha waxaa ka lumaysa
mudnaantiisa, ayadoo dadka kale ee ku jira tartanka sama-
tabixinta hantidaas loo oggolaanayo inay keeraan ogeysiiska
samatabixinta ayagoo markaas la siinayo mudnaanta.

2. Mar haddii la bilaabay hawsha samatabixinta ayadoo
la og yahay dadka leh hantida, galeyna dhibaato, hawsha
samatabixinta lama joojinayo ayadoo aysan jirin sabab
macquul ah.

3. Markii ay dhamaadaan hawlaha samatabixinta, samata-
gudahood
bixiyaha wuxuu toban (10) maalmood/laga bilaabo imaan-
shaha dekedda ee markabka samatabixinta ama toban (10)
maalmood gudahooda laga bilaabo dhamaadka hawsha haddii
uusan ku saabsanayn istimaalka markabka, samatabixiyuhu
wuxuu ogeysiinayaa qofka leh hantida haddii la yaqaan
ama Waaxda Badda isagoo diyaarinayaa hantida la samata-
bixiyey sidii loogu gudbin lahaa mulkileysa ama Waaxda
Badda.

223
(221)

QODOBKA 176-AAD

MAGDHAWGA IYO ABAAL-MARINTA IYO XADKA

1. Haddii la fuliyo waajibaadka samatabixinta ayadoo la dhameeyey gudbinta hantida, samatabixiyuhu wuxuu xaq u leeyahay magdhawga khasaaraha uu galay isagoo loo soo celinayo kharshka la galay oo loogu darayo abaalmarin la gooynayo ayadoo la tixgelinayo qiimaha hantida la samatabixiyey, dadaalka iyo khatarta loogu galay samatabixinta. Haddii markabka/^{samatabixinta}uu saaran yahay qalabka samata bixinta, markabku wuxuu xaq u leeyahay xitaa kharashka guud ee uu galay.
2. Abaalmarinta waxaa loo qaybsanayaa sida ku xusan Qodobka 172-aad ee Sharcigan.
3. Dacwooyinka magdhawga, soo celinta kharashka iyo abaalmarinta waxaa la oogayaa ayadoo ay ku heshiiyeen dhinacyadu ama sida waafaqsan habka dacwadaha ee ku xusan Qodobada 170-aad iyo 171-aad ee Sharcigan.
4. Dacwooyinka Magdhawga, soo celinta kharashka iyo abaalmarinta waxaa la hor keenayaa Maxkamadda ku shaqada leh ee

224
(22)

Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya, laba (2) sano guda-
heed laga bilaabo taariikhda dhamaadka hawsha samatabi-
xinta haddii kale daawadahaas laba furi karo.

QODOBKA 177-AAD

SAMATABIXINTA UU SAMEEYAY KABTANKA

M A R K A B K A

1. Ayadoo ay jiraan Qodobada Qaybtan, waxaa mudnaanta
la siinayaa xaqa samatabixinta ee Kabtanka markabka oo
markii u dhaco shilka, caddeynayaa inuu doonayo inuu
noqdo samatabixiyaha koowaad, u aheegayana Waaxda Badda
ee ugu dhow.
2. Haddii uusan jirin heshiis ka dhexeeya Kabtanka iyo
Markableyga, xisaabta abaalmarinta ay leeyihiin Kabtanka
iyo Shaqaalaha oo gacan ka geystay hawsha samatabixinta,
waxaa sameynayaa Waaxda Badda ama Hay'adda Qunsuliyadda
ayadoo la tixgelinayo qiimaha hantida la samatabixiyey,
dadaalka iyo khatarta ay galeen samatabixiyeyaasha.

225

(223)

QODOBKA 178-AAD

HELIDDA QOLOFKA MARKABKA IYO

OGEYSIISKA LOO BAAHAN YAHAY

Qof kasta oo ka hela qofofka markabka oo qiimahiisu ka badan yahay shs. So. 5,000/=, soohdinta dhulka xeebaha ama qaybaha kale ee badda Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya, waa inuu ogeysiiyaa Xafiiska ugu dhow ee ku saabsan arrimaha badda oo ay leedahay Jamhuuriyadda. ~~Qofka~~ helay qofofka ama hay'adda badda waxay isku dayeysaa inay ogeysiiso mulkileyda qofofka, ayadoo ku dadaalaysa aqoonsiga mulkileyda haddii aan la aqoonin markii la helay qofofka markabka.

QODOBKA 179-AAD

HAYSASHADA IYO LAHAANSIYADA HANTIDA

SAMATABIXINTA, HANTIDA LAGA TEGAY

DAQWOGYINKA DAWLADDA

1. Markii la helo ogeysiiska helidda qofofka markabka ama loo gudbiyey hantida la samatabixiyey, Hay'adda Badda ee qaabilsan, haddii aan la aqoon mulkileyda hantida, waxay soo faafinaysa ogeysiis inuu qofka danta ka leh

hantida uu muddo lix (6) bilood gudahood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska ku soo oogo dacwadda. Haddii aan dhinacna soo oogin dacwadda lahaanshaha, lix (6) bilood gudahood, laga bilaabo taariikhda marka ugu horreysa la soo faafiyey ogeysiiska, hantida waxaa la caddeynayaa inay tahay mid laga tegay, lahaanshahaheedana waxaa lagu waa wareejinayaa qofka helay ama samatabixiyey.

2. Alaab kasta oo ku saabsan fanka, taariikhda, arkiolojiyada ama itnograafiyada, ahmiyadna u leh Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya laga helay ama lagu samatabixiyey dhulka xeebaha ama qaybaha kale oo ay leedahay Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya waxaa laga reebay faqradda I-aad ee Qodobkan. Kaddib markii loo oggolaado qofka helay ama samatabixinta fursadda ogeysiiska iyo dhegayal sidii loo goyn lahaa xuquuqda hantida ama dacwadda magdhawga, soo calinta kharashka iyo abaalmarinta, haddii dacwadda ay Jamhuuriyaddu ku gar hesho waxaa lagu dhawaaqayaa inay ka mid tahay hantidaas khasnadda qaranka ee Jamhuuriyadda ama arrimaha taariikheed iyo magaca Jamhuuriyadda. Xaaladaas oo kale Jamhuuriyadda waxaa wajjib ka ah inay tahay inay siiso

- 227
(225)

qofka helay ama samatabixiyey dhammaan dacwooyinka mag-
dhawga, soo celinta kharashka ama abaalmarinta.

3. Hantida laga tegay oo laga helo dhulka xeebaha, deked-
daha, biyaha gudaha ama biyaha gooshida ee Jamhuuriyadda,

kaddib markii laga bixiyo ogeysiis hal bil oo ku saabsan

rijeeddadaas, waxna la wareegaysa Jamhuuriyadda ayadoo

laga xaraashayo macl. fagaara ah, hase yeeshee, Hay'adda

dawladda oo ku shaqada leh waa inay qaada tallaabooyin

baboon si loo aqoonsado mulkilcyda hantidaas ayadoo

bixinaysa ogeysiis ay ku sheegayso meesha, tilmaanta iyo

maaladda hantida laga tegay. Ha bil kaddib taariikhda

faafinta ogeysiiska, hantida waxna loo qaadanayaa in looga

tegay ayadoo laga bixinayo ogeysiinta iibka. Haddii, ka

dib markii lagu gado naado fagaara ah, hantida lagu dacwo-

day lana keeno caddeyno ku saabsan lahaanshaha, hantilcyda

waxay xaq u yeelanayaan inay helaan inta ka soo hartay

haddii ay jirto, lacagta iibka, lacag u dhiganta qiimaha

hantida ku sugan maaladdii looga tegay marka laga jaro

lacag u dhiganta dhammaan kharashka ay dawladdu ku bixisay

soo saarista, ogeysiinta iyo iibka.

228

(226)

QAYBTA VIII

RAHANKA BADDA IYO BURSINNOOYINKA

QODOBKA 180-AAD

NIDAAM GUUD :

1. Qodobada Qaybtan waxay dhigayaan nidaanka bursinooyinka ku saleysan rahanada badda ee lid ku ah maraakiibta. Dhisaha rahan badeed waxaa la siinayaa mudnaanta kaga sarreeysa rahanada kale ama bursiinada guud ama gaar ahaaneed.
2. Haddii hanti ku lug leh rahan badeed ay hawdo ama ay yaraato, bursiinadu way jiraysa laakiinse waxaa lagu dabbaqayra ilaa xadka qiimaha inta soo hartay oo kaliya.

QODOBKA 181-AAD

DACWOYINKA BURSIIMOYINKA

Waxyaabaha hoos ku qoran waxay dhalinayaan rahanada badda ee maraakiibta iyo badeecadaha kor saaran intii loogu jiro safarka oo ay bilaabatay dacwadda dhalisay rahanka ku saabsan qalabka, iyo alaabta kale ee ku rakiban ama la socda markabka:-

- b). Kharashka Garsoorka ama ajuurooyinka iyo canshuurta uu ku looyahay markulka oo ka dhasha

danta guud ee doyn-bixiyeynasha si loo bad-
badbaadiyo markabka; kharashka qabanqabada
iibka markabka iyo qaybinta lacagta iibka;
ajuurada niisaanka, nalka iyo dekedda iyo
canshuurta kale ee dawladda oo la midka ah,
ajuurada wadidda, kharashka ilaalinta iyo bad-
baadinta laga bilaabo waqtiga soo gelida mar-
kabka dekedda Soomaaliyeed.

- t). Dacwooyinka ka dhasha shaqa qorista Kabtanku
ama dadka kale ee loo qaatay shaqada markabka
iyo dacwooyinka ka dhasha heshiiska shaqada
badda.
- j). Lacagta loo bixiyey kaalinta, sarntabixinta iyo
ku biirista khasaaraha guud ee markabka.
- x). Magdhawga iyo khasaarooyinka kale ee laga rabo
inuu bixiyo markabku kuna saabsan shilka markabka,
khasaaraha la gaarsiiyey dekedaha, neelaha lagu
xiro markabka iyo qalabka badneridda; dacwooyinka
ku saabsan dhawac shakhsiyeed ee la gaar-
siiyey rakaabka ama Shaqaalaha, magdhawga lumidda
ama khasaaraha gaaray badceecooyinka ama xafashka.

kh).

Dacwooyinka ka dhasha heshiisyada, adeegyada
la qabtay ama falalka uu geystay Kabtanka
markabka, markuu uu/^{ka}naqan yahay dekedda
dalka hooyo iyo haddii heshiisyadaas, adeeg-
yadaas ama falalka ay ahaayeen kuwo lagama maar-
naan u ah badbaadada markabka markabka ama
socodsiinta safarka. Faqraddan waa in lagu
dabbaqaan xataa haddii Kabtanka uu yahay mul-
kileyda ama uu ku leeyahay qayb markabka iyo
haddii dacwadda uu isagu leeyahay ama ay lee-
yihin deyn bixiyayaasha kale.

d).

Rahamada Badda oo ku saabsan markabka waa
wajibaad ku xiran markabka oo la xiriira
xatar dhinacyo saddexaad oo iibsanaya markab-
ka oo mas'uul ka noqonaya rahanka markabka
haddii ay iibsadaan markabka.

r).

Bursiinta waxay ku xiran tahay waxana lagu
fulin kara xamuulka haddii laga rabo ama lacag-
ta ay ku jirto guacanta Kabtanka ama Wakiilka
marlableyga.

231
(229)

s). Bursiirada waxaa kaloo lagu fulin karaa markab uu maamulayo Hawlgeliyaha oo aan ahayn mulkiilaha, ayadoo aan rahanka lagu xiraa karin xaladahaas haddii Hawlgeliyaha uu si aan habboonayn ama si sharci darra ah u gutay hawshiisa taasoo dhalisay waajibaadka iyo falalkaas uu oгаа deyn bixiyaha markii uu waajibaadku dhacay kaasoo dhaliyey rahanka lagu dacwoocynayo.

QODOBKA 182-AAD

DHAMMEYSTIRKA IYO MUDNAANSHAHA DACWOYINKA

1. Dacwooyinka waxay ku dhameystirnaaan ayadoo la fuliyey rahanka badda kadib markii ogeysiis la siiyey Waxda Badda. Dacwooyinka aan la dhameystirin hal(1)sano gudaheed laga bilaabo taariikhda falka ama dhacdada dhalisay dacwadda waa dhacayaan.
2. Dacwooyinka waxaa la siinayaa kala mudnaanta, guud ahaan ayadoo tixgelin la siinayo waqtiga iyo taariikhda la dhameystiray ayadoo la siinayo mudnaanta kowaad tan ugu horeysay; Hase yeeshee dacwooyinka ku saabsan rahanka badda oo la dhameystiray kuna xiran safarka ugu danbeyey waxay mudnaanta kaga looyihiin kuwa ku xiran

safarka ka horeeyey ayadoo deynbixiyaha dambe uusan waxba ka ogeyn arr. aysan jirin wax sabab ah oo khasab ka dhig- eysay inuu ogaado rahanada hore.

3. Rahanada badda ee la dhameystiray waxay ka hooseeyaan dacwooyinka deynbixiyeyaasha leh damanad.

4. Ka sokow qodobada sharcigan, sharciga Madaniga iyo xeerka habka madaniga, maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimuqra- adiga Soomaaliya waxay ku dabaqaysan fasiraadda garsoorka.

QODOBKA 183-AAD

LACAGTA LAGU DACWOONAYO

Haddii la iibiyo hanti ku lug leh rahanka badda, deyn-bi- xiyaasha haysta rahan la dhameystiray, waxay xaq u lee- yihiin iney soo bandhigaan dacwooyinkooda oo dhan iyadoon la tixgeliin nidaanka uu dhigayo sharcigan oo ku saabsan xadeynta mas'uuliyadda ama dhinista ku biirista lacagta khasaaraha guud. Qeybinta lacagta waxaa lagu dabaqayaa mudnaanta deyn bixiyeyaasha ayadoo la raacayo taariikhda dhameystirka rahan baddeedka.

QODOBKA 184-AAD

BURSIINOYINKA HANTIDA LA RARAY

1. Rahannada badda oo dhalinayaa bursiinooyinka ku lug leh hantida lagu raray markabka, waxay loo ogolaanayaa

darajjoooyinka soo socda:-

- b). Kharashka sharciyeed ee uu leeyahay maraalka ama lagu galay danta deyn bixiyeyaasha oo ku lug leh xajiraada ama talaabooyinka fulinta ee lagu qadayo hantida.
- t). Qanshuurta furdada ee lagu leeyahay hantida meesha lagu dejiyo.
- j). Magdhawga iyo abaalmarinta kaalrada iyo samta-bixinta iyo lacagta lagu leeyahay badoocadaha kuna saabsan ku biirista kharajka khasaaraha guud.
- x). Deyraha ku dhalanayaa heshiisyada maraalka oo ay ku jiraan kharashyada dejinta iyo keydinta ee hantida saaran markabka.
- kh). Lacagta masamalka iyo dulsarka ku saabsan wajibaadka uu galay kabtanku sidii uu u fulin lahaa kharajyada maraalka ah oo lagu ilaalinayo badoocadaha iyo danta dirayaasha.

2. Haddii hantida la raray ay lunto ama khasaarowdo, lacagta magdhawga ee lumista ama khasaaraha, oo ay ku jirto tan ceyniska waa in la siiyo deyn bixiyeyaasha

- 234
(234)

lagu tilnamay qodobkan haddii aan lacagahaas la helay
si degdeg ah loo isticmaalayn si toos ah hagarjinta ama
bixiinta khasaaraha soo gaaray.

QEYBTA IX

RAHANNADA

QODOBKA 185-AAD

MUDNAANTA RAHANNADA MARAAKIIBTA-HABKA IYO FAAFINTA

1. Curaar loo dhiibay si loo magangeliyo waajibaad dhaga-
ale oo si toos ah ku xiran markabka waxaa loo qaadanayna
dan magangashan, mar haddii la dhameystirayna waxay mudna-
an kaga leedahay dhamaan rahannada kale ee markabka oo
lagu tilnamay sharcigan, marka laga reebo rahannada ka
dhashay mushaharootyinka shaqaalaha oo aan la bixin oo
leh mudnanta ugu sareysa. Rahanka markabka oo la dhame-
ystiray waxaa weeye caddeynta xuquuqda qofka loogu dhiibay
rahanka, inuu ka bixiyo lacagta harsan ee arrahda ee uu
damaanad qaday rahanku.
2. Rahannada maraakiibta waxay abuurayaan lahaansho mar-
waana
kab, /inay ahaadaan qoraal si loo dhigan geliyo loona faa-
fiyo si looga dhigo rahan dhameystiran, sida waafaqsan
Qodobada 72, 73 iyo 74-aad ee Sharcigan. Nuqul tasdiigan

235
(233)

oo ku saabsan mudnaan rahan markab oo dharmocystiran
waxna lagu haynayaa warqadaha rasniga markabka dushiisa
waxaana lagu dhigayaa diiwaanka ku shaqada leh ee markab-
ka. Kala mudnaanta rahannada waxa lagu caddeynayaa taariikhda ku qorista diiwaanka markabka ayadoo uu leeyahay xaqa ugu horreya qofka ugu horreyey oo ka mid ah rahannada fuliyey shuruudaha iyo qoraalada faafinta.

Ku qorista diiwaanka markabka waxay xaqiijinaysaa rahanka muddo saddex (3) sano, waana in la cusboonaysiiyaa, haddii kale wuxuu ku dhamaanayaa dhamaadka muddadaas.

3. Rahanka markabka waxaa loogu bixin karaa dhisnaha markabka taasoo khasab ku ah in lagu qoro diiwaanka maraakiibta, doonyaha ama maraakiibta yaryarka, sidii hadba habboon, waxaana lagu qorayaa caddeyn ku saabsan ballarka markabka iyo qiyaasta miisaanka iyo neesha lagu dhisayo markabka.

4. Qofkii loo dhiibay rahanka wuu gedi karaa ama ku wareejin karaa dhinaca saddexaad.

236

QODOBKA 186-AAD

AWOOD RAHAN MARKAB.

1. Rahan markab waxaa sancyn karaa markableyga ama wakiilkiisa oo ka haysta wakaalad buuxda oo qoraal ah.
2. Haddii ay jiraan laba ama ka badan mulkiley oo leh isla markabkii, rahanka waxaa lagu dhiibi kara ayadoo ay codka oggolaanshaha dhiibeen labaanshaha saddex neelood laba neel ama haddii ay jiraan diruufo degdeg ah, ayadoo la raacayo amarka Maxkamadda oo uu soo codsaday mulkileyga.
~~Qodka qeyb~~ ku leh markabka wuxuu rahni karaa saani-giisa keliya markii ay ogollaadaan wada labaanshaha markabka intooda badan.
3. Rahan markab wuxuu xayirayaa markabka; marka laga reebo damaanado shakhsiyeed oo qoraal ah ee mulkileyda oo gooni ka ah rahanka markabka, waajibaadka la xiriira rahanka waxay u gudbayaan iibsadaha danbe ee markabka, ha ahaado iibsade dhinac saddexaad ah ama mulkileyda mid ka mid ah.

QODOBKA 187-AAD

WAAJIBAADKA QOFKA RAHANKA DHIGAYA

1. Ka hor intaan la dhiibin rahanka markabka, qofka rahanka dhiibaya waa inuu qoraal ugu caddooyaa qofka loo dhiibayo rahanka, haddii ay jiraan rahanno badeed, rahan hore ama waajibaad ama mas'uuliyad kale oo saaran markabka ee uu ogyahay qofka dhiibaya rahanka ama la rabay inuu ognado.
2. Qofka dhiibaya rahanka ma oggolaanayo fulinta rahamada ama waajibaad kale oo damniinsan lidna ku ah markabka laga bilaabo taariikhda dhiibista ogeysiiska qoraalka ah ee ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan ilaa uu qofka looga rahamay uu waqti haboon u heystay fulinta shuruudaha dharmooyinka rahankiisa sida keenista arjiga iyo faafinta; Hase yeeshee waajibaadka lagu sheegay faqraddan kuma jirto mushaharooyinka shaqaalaha markabka ama dawooyinka la xiriira khasaaraha guud oo ka dhashay lacagta ama kaalmeysata/sarata bixinta.
3. Qofka dhiibay rahanka markabka oo lagu helo xad gudub Qodobbada qeybta isagoo sameeyey falal khiyaano waxa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badneyn Sh.So.25.000/= ama xarig aan ka badneyn laba sano (2) ama labadaba.

238
(236)

QODDIBKA 188-AAD

KA QAADIDA RAHANKA IYO IIBKA

1. Qofka iibsaday markabka doonayana inuu isaga ilaaliyo xarig iyo fulin rahan, wuxuu u gudbin karaa dhamaan deyn bixiyeyasha ama dadka gudbiyey rahanka, shahaadada xuquuqda isagoo caddeynaya ujeeddadiisa ku saabsan bixinta deynta rahanka ha ahaado mid bislaaday ama in kale, ilaa xadka qiiraha iibka ee uu bixiyey. Ogeysiiskaas si uu u noqdo mid tixgelin leh, waa in la dhiibaa toban iyo shan (15) maalnood gudahood laga bilaabo taariikhda la diiwaan-geliyey iibka.

Caddeynta ujeeddadaas waxaa lagu xadeyn karaa bixinta lacagta hartay ee lagu lahaa rahanka sidii deynka lid ku ah markabka la casriyeen lahaa. Oggolaanshaha ogeysiiska iyo bixinta dhabta ah, waxay dabooleysaa deynta iyo sii deynta rahanka. Ka dib markii la bixiyey ama la sii daayey, waa in sidaas lagu qoraa diiwaanka markabka iyo waraaqaha rahanka isagoo ku dhigayaa qofka loogu dhiibay rahanka.

2. Qofka loo dhiibay rahanka markabka oo lagu gefay wuxuu arji u qoran karaa Maxkamadda awooda/ ee ka tirsan Janhuu-
u leh

239
(237)

Hay'adda, isagoo ka codsanaya iney bixiso amarka iibka
xaraashka ee markabka ayadoo tilmaameysa xaqa qofka loo
dhiibay rahanka ee lacagta iibka ilaa xadka wajibaadka
ku saabsan rahanka marka lagu daro kharashka garsoomka
iyo iibka. Ogeysiiska falkaas iyo dhegeysiga dawladda
waxaa la siinayaa qofka dhiibaya rahanka.

3. Dixiinta dhamaan deynta ku saabsan rahanka waxay
keeneysaa ka qaaddida rahanka, waana in lagu qoraa
diiwaanka markabka.

BUUGGA V

QODDADA HADKA

QEYDHA I-AAD

BAARITAANKA IYO DACWOYINKA

SHITATKA BADA

QODDHA 189-AAD

BAARITAAN KOOBAN

Hay'adda badda ama Qunsuliyadda ee lagu tilmaamay
qodobka 30-aad iyo dadka lagu tilmaamay qodobka 57-aad
ee sharcigan, ka dib gudbinta kaalada, waxay ku saacy-
nayaan baaritaan sababaha iyo duruufaha keentay shilka
ama dhacdada waxayna qaadaysaan dhamaan tallaabooyinka
lagama maarmaanka ah ee loogu ilaaliyo caddeynta sababa-
haas.

240
(238)

Warbixin rasni ah ayey sancynaysaa hay'adda, haddiise
la tilmaano gef ama hawl sharci-darra ah waa in si deg-
deg ah warbixintaas loo gudbiyaa Waaxda Dadda oo isla
markaas ogeysiincaysa hay'adda Garsoorka ee ugu sokeysa.

QODDBKA 190-AAD

TALLAABOYINKA KALE - DAWOOCYIN MAXKAMADEED

Ka hor intaan la bilaabin tallaabooyinka garsoorka
ee lagu xallinaayo dawooyinka ka dhasha shil-baddeed
dhaawac ama geeri ka dhacda markab dushiisa, dhinacu
waa inuu marka hore isku dayaa inuu dhibaataada ku dhame-
eyo heshiis ay raali ka noqdaan dhamaan dhinacyada arri-
ntu khuseyso, isagoo ka codsanaya Waaxda Dadda in ay soo
dhexgasho dhexdhexnadiyena ka noqoto. Haddii lagu guu-
leysan waxyo heshiis dhinaca dawoonayaa wuxuu isku
dayayaa tallaabooyin macmuleed ee uu qaadi karo ka hor
inta uusan maxkamad ku taal Janhuuriyadda Dimaqraadiga
Soomaliya, ka furin dacwadda. Maxkamaddu, ka hor inta
aysan oggolaanin furista dacwadda, waxay fiirincaysaa
dhamaan baaritaanada rasniga iyo waxyaabaha caddeynaya
inuu dactooduhu ku dadaalay qaadista tallaabooyinka kale,
hase yeeshee waxay siincaysaa caddeyn lid ku ah/taageo-
rayaa warbixinnada baaritaanadaas.

241
(239)

QEYDHA II

DACWOOCYINKA SHAQADA

QODCEKA 191-AAD

TALMAABOOCYINKA MAAMULKA.

1. Dacwooyinka shaqada waxna ku jira dacwooyin ka dhasha
ama saaneeya waxyaabaha soo socda:-

- b). Fulinta shaqada ee badmaxiinta.
- t). Xiriirka fulinta shaqada dekedda dhexdeeda,
oo ay ku jiraan dacwooyinka la xiriira musha-
harooyinka.
- j). Mushaharka Hawgeliyayaasha maraakiibta yar-
yar ka iyo dadka ku shaqada leh raridda iyo
dejinta badeecooyinka iyo dhaqdhaqaaqa rakaab-
ka dekedda gudaheeda.

2. Ka hor inta aan Maxkamad Soomaliyood la hor keenin
dacwadda, dacwoodaha waa inuu isku dayaa dhamaan tal-
laabooyinka maamulka ee u furan isagoo marka hore dacwadda
u gudbinaya Xafiiska shaqada ee qaabilsan.

242
(140)

QAYBTA III

XAYIRAADDA MARAAKIIBTA

QODCEKA 192-AAD

UJEEDEEDA IYO DABBAQIDDA NIDAAMKA

1. Markab lagu tuhmay ku xad gudubka shuruuca cigaabta ee Janhuuriyadda ama lagu tuhmay xad gudubka shuruuca iyo xeer-nidaaniyeyaasha ku saabsan xiriirka qaybaha badda ee Janhuuriyadda, ama kuwa lagu tuhno ku xad gudubka xuquuqda biyaha gudaha, badda dalka, qaybta xigta, qaybta gaarka ah ee dhaqaalaha ama qaybta badda hoosteeda oo ay leedahay Janhuuriyadda Dimuqradiga Soomaliya, waxna lagu soo rogayaa tallaabooyinka xayiraad/deg deg ah, kuwaasoo uu qaadi karo ~~maxkamad~~ awoodda u leh ama hay'ad ka tirsan Janhuuriyadda.

Xirida waxaa lagu dhamcoystirayaa arji loo qorto Maxkamad awood u leh oo ka tirsan Janhuuriyadda Dimuqradiga Soomaliya ayadoo arjigaas lagu sancynayo magaca Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga & Gaadiidka Badda.

Markii loo keeno arjiga xiridda, maxkamaddu waxay hixincysaa si deg-deg-ah ama ka xiridda markii loo keeno

243
(241)

caddeyn ku filan oo tilmaamaysa in loo baahan yahay baaritaan kale. Arjigaas waa in la siiyaa tixgolin gaar ahaaneed oo degdeg ah xataa haddii la keensado maalin ay Maxkamaduhu ku jiraan fasax ama ay xiran yihiin ayadoo lagu jiro fasax garsoor, waxaana amarkaas lagu soo saarayaa saxiix Garsoore, ayadoo la tilmaamayo magaca iyo jinsiyadda markabka, dekedda uu markabkaasi joogo iyo shuruudaha kale ay markaas ku xirto hay'adda soo saartay amarkaas.

Dhegaysiga dacwadda ee ku saabsan duluucda oo uu joogi karo Wakiilka markabka la dacwoeynayo, waxaa la muddeeynayaa waqtiga ugug horreeya kaddib markii la ogeysiyo amarka xiridda, markabkana lagu soo rogo xayiraadda.

Ogeysiiska xiridda markabka wata Calan Shisheeye, oo duruuqaha la soo sheegay, waxaa loo gudbinayaa Dalka caalanka ayadoo la sii-marinayo darsiiga dibloomaasiyadda.

2. Xayiraadda markabka wata Calan Soomaaliyeed, ama Calan Shisheeye oo culeyskiis: ~~haya~~ yahay toban(10)tan waxaa lagu dhaqayaa habka shaariga.

3. Xayiraadda markabka wata Galan Soomaaliyeed ama Galan Shisheeye, oo aan lagu sheegin faqraddan 1-aad ee Qodobka, waxna loogu dhammeystirayaa dadka keensaday dacwooyinka badda sida lagu xusay Qaybtan.

QODOBKA 193-AAD

DACWOOCYIN BADEED - CADDEYMO

Dacwooyinka badda oo fulintooda uu ku jiri karo amarka xayiraadda markabka waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda:-

- b). Mushaharooyinka Kabtanka, Saraakiisha iyo Shaqaalaha.
- t). Dhibaato uu geysto markabka markii uu galo shil ama si kale.
- j). Khasaaro naf ama dhaawac shakhsiyeed ee uu geysto markabka ama ay dhacdo inta la fulinayo hawlaha markabka.
- x). Kaalrada iyo Sanatabixinta.
- kh). Heshiis ku saabsan isticmaalka ama ijaarka markabka ha lagu kiraysto safar ahaan ama si kale.

245
(243)

- d). Heshiis ku saabsan qaadista badeecooyinka ee badda ayadoo markabka la kireystay ama si kaleba.
- r). Khasaaraha Guud.
- s). Jiidista iyo bagdada.
- sh). Kharashka badeecooyinka ama alaabta marka loo gudbiyo markabka ee loogu baahday socodsiinta hawshiisa.
- dh). Dhismaha iyo hagaajinta markabka, qalabkiisa ama ajuurooyinka ku xirnaanshaha dekedda iyo ajuurooyinka kale ee dekedda.
- c). Kharashka uu galo Kabtanku, Diraha, Kireystaha ama Wakiilada oo ay natalaynaan markabka ama Markableyda.
- g). Khilaaf ka dhexeeya Mulkiyeyda wadaga lahaanshaha markabka kuna saabsan xuquuqda lahaanshaha, hay'adaha dakhliga markabka.
- f). Khilaafaadka aan ahayn kuwo ka dhex dhasha Markableyda, kuna saabsan lahaanshaha markabka.

246

oo ay ku jiraan dacwooyinka ku saabsan ra-
hanada.

q). Dacwooyinka madaniga ee lid ku ah markabka
ama Markabkeyga iyo,

k). Dhamaan dacwooyinka ku saleysan falalka
ee uu Mulkileyska ama Hawlgeliyuhu awood u
lahaanayo inuu koobo mas'uuliyadda.

QODDOKA 194-AAD

MARAAKIIDTA IA XIRI KARC

1. Marka laga reebo inta ku xusan faqradda 2-aad ee
Qodobkann, dacwooyinku wuxuu dooran kara inuu codsado
xayiraadda markabka gaar ah oo galay shil ama dhacdo ay
dhacaddu ka dhalatay ama markab kale ee uu leeyahay isla
qofkii ama qofalka, isla meshii uu ka dhacay shilka ama
dhacdada ay ku saleysan tahay dacwaddu.

Hase yeeshee dacwooyinka ku saleysan faqradda
hoosaadaya (g), (f) iyo (q) ee Qodobka 193-aad xayiraad-
du waxa lagu saneyn kara keliya markabka galay shilka
ama dhacdada ay dacwaddu ku saleysan tahay.

247

2. Haddii dacwaddu ay ku saleysan tahay shilka ama dhac-
dada ku saabsan markab ku shaqeysanayo kiro ama Hawlgeli-
yaha aan ahayn markableyga hase yeeshee haysta caddeynta
Hawlgeliyeniinta. dacwooduhu wuxuu warsan kara xayiraadda
markabka ku shaqada leh ama markab kale ee uu leeyahay
kireystaha ama Hawlgeliyaha laakiinse ee codsan karo
xayiraad markab kale ee uu leeyahay Mulkileyga markabka
la kireystay oo galay shilka ama dhacdada.

QODDOKA 195-AAD

XAYIRAAD AMAR MAXKAMADEED DACWAD

Wixii ka baxsan inta ku qoran faqradda 1-aad ee Qo-
dodka 192-aad ee Qaybtan, laguna oggolaaday awoodda Hog-
gaamiyaha Dekedda, Hay'adda Dekedda, iyo Saraakiisha Coo-
fimaadka oo xayiri karta dhoofidda maraakiibta la soo
dacwoocay, xiridda markabka waxna lagu fulin kara ayadoo
la raacayo amarka Maxkamadda awood u leh oo ka tirsan
Janhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya.

248
(246)

QODOBKA 196-AAD

SII DEYNTA MARKABKA LA XIRAY

1. Dacwooyinka ku saabsan xiridda markabka ayadoo la raacayo faqradda 1-aad ee Qodobka 192-aad ee Sharcigan, markabka la xiray, waxaa lagu siideyn kara amar Maxkamadeed oo ku siideysay xuriyad ku meel gaar ah ama darmaanad u dhiganta ugugyaraan qiiraha ganaaxa ugu sarreeya ee lagu qaadi karo Qodobka 9-aad ee Sharcigan ama kaddib la qaaday dacwad oo lagu waayey markabka dacwaddii ama markabka ama qofka arrintu saameysay ee lagu helay denbiga kaddib laga siidaayo xarigga ayadoo la bixiyey ganaaxyada oo dhan oo ay maxkamaddu ku xukuntay.

2. Xaaladaha ku saabsan haddii markabkii lagu xiray dacwooyinka ka dhasha tilmaamaha ku xusan faqrad-hosaad-yaha (1) iyo (n) ee Qodobka 193-aad ee Qaybtan, hawl-galka markabka waxaa loogu oggolaanayaa imuu socdo isagoo dacwooduhu keensanaya darmaanad ku filan oo lagu ilaalinayo danaha dacweysanaha ama si kaleba loo oggolaado in hawlaha ay socdaan si loogu ilaaliyo danaha dharmaan Markabka wada jahannamka ama kuwo dii-waangashan.

249
(277)

3. Haddii dhinacyadu ay ku heshiin waayaan lacagta ama damaanada la dhiibayo, Maxkamadda ayaa go'aan ku gaaraysa kaddib markii dhinacyada fursad loogu siiyey keenista doodaha.

4. Dhiibista damaanada ama codsiga siideynta markab xiran looma qaadanyo oggolaanshaba mas'uuliyadda iyo ka tamasulid faa'idada xadeynta mas'uuliyadda ee markableyga.

QCDCBKA 197-AAD

DHIIBISTA DAMMAANADDA

Haddii aysan jirin duruufo gaar ahaaneed oo markaas la siinayo ogeysiis kale sida degdeg ah, amarka Maxkamadda ee xiridda markabka waxaa la socda warbixinta ku saabsan saacadda, taariikhda iyo neesha sida ku xusan habka madaniga. Amarka waxaa lagu codsan karaa keenista dammaanadda dheeraadka ee dacwoodaha, hase yeeshee dammaanadda waa mid khasab ah haddii dacwoodaha markaas uusan haysan rukhsadda joogista dalka Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaliya.

250
(248)

QOQOQKA 198-AAD

DACWAD KU SAABSAN DULUUCDA

Amarka maxkamadda ee xiridda waxaa lagu goynayaa saacadda, taariikhda iyo neesha lagu qabanayo dacwadda garsoorka oo ku saleysan duluucda dacwadda. Ogeysiiska waxaa lagu tilmaamayaa in dhegaysiga dacwadda ay dhinacyada fursad u helayaan gudbinta doodahooda.

Waxaa kaloo ogeysiisku dhigayaa in haddii dhinacu uu ku gefo imaanshaha, ha ahaado mid shakhsiyeed ama keenista doodaha qoraalka, waxaa lagu xukumayaa isagoo dhinacu maqan yahay. Dacwadda ku dhisan duluucda waa la sii wadayaa si looga baajiyo daahidda ku dhacda markabka la dacwooyey haddii dacwooduhu uusan keenin araajida lagana maarmaanka ah sida uu dhigayo habka madaniga, muddo soddon (30) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda xiridda markabka, waxaana la sii-deynayaa markabka ayadoo dacwadda la tirtirayo.

251

(249)

QODDKA 199-AAD

~~RAADKA~~ KA YIMAADA XARIGGA-KORMEERKA

G A R S O O R K A

1. Guud ahaan xiridda markabka waxna markabka ka reebaysa ka bixidda dekedda ugu horeysa ee uu soo galay, kaddib xiridda ayadoo la tixgeliinayo awoodda Hay'adda Dadda amn Garsoorka Janhuuriyadda si xayiraad loogu soo rogi lahaa dhaqdhaqaaqa markabka iyo dadka fuushan markabka ee loogu baahdo si loo ilaaliyo caddeynta iyo xasiloonida guud amn lagu xaqiijinayo maaladda la joogo ilaa xuquuqda iyo mas'uuliyadaha la isugu haysto go'aan garsoor laga gaaro.

Hase yeeshee mar kasta waxna lagu soo rogayaa xayiraadda lagama maarmaanka u ah markabka iyo dadka fuushan markabka.

2. ~~Markamadda~~ awoodda u leh oo dhegaysatay dacwadda ku saleysan duluucda waxay kormeeraysa ilaa go'aanka karn danbeysta ah iyo fulinta dacwooyinka oo dhan. Fulinta Garsoorka waxna ku jira awoodda maxkamadaha ee ku saabsan dhammaan amarada iyo ogeysiiska fal kasta oo danbe ee la

252
(250)

qaadayo loona gudbinayo dharmaan dhinacyada ee khuseysa
dacwadda.

3. Maxkamaddu waxay kaloo ogeysiis ka siinaysa ama-
radeeda Guddiga Qaranka qaabilsan ama hay'adaha kale ee
badda sidii looga roobi lahaa maraakiibta la xiray,
bixitaankooda.

QODDBKA 200-AAD

BAADKA KA YIMAADA IIBKA AMA LA WAREEGID

Haddii fal garsoor oo lagu qaaday Qaybtan kaga
dhasho inay maxkamad amar ku bixiso gadid ama ku waree-
jinta markab/^{ka}Janhuuriyadda markab, wareejintaas waa la
diiwaangelinayaa ayadoo ogeysiis rasmi ah la dhiibayo
sida waafaqsan Qodobka 73-aad ee Sharcigan.

253

(251)

DUUGGA VI

KA HORTEGIDDA WASAKHEYNTA DADDA EE

MARAAKIIBTA

QAYBTA I

DARNAAMIJKA IYO XEER NIDAAMIYAH

QCDOBKA 201-AAD

MAAMULKA DARNAAMIJKA

1. Wasiirka Kalluumaysiga & Gandiidka Dadka, wuxuu awood u leeyahay inuu dejiyo, fuliyo iyo hirgeliyo barnaamij loogu tala galay ka hortegidda wasakheynta dadka oo kaga yimaada maraakiibta. Barnaamijka waxaa ku jirayaa awoodda dhammaan Qaybaha Dadka ay awood ku leedahay Jannuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliya oo ay ka mid yihiin dhulka xeebaha, biyaha gudaha, dadka dalka, qaybta ku xigta, qaybta gaarka ah ee dhaqaalaha iyo qaybta dadka hoosteeda waxaan ka loo ku jirayaa awoodda ku dhabaqidda tallaabooyinkaan xataa inta ka baxsan xadka awoodda haddii hawlaha ku saabsan ka bixidda xadka ay khatar ku saabsan wasakheynta dadka u keenayaan biyaha Soomaaliyeed.

254
(252)

2. Ayadoo la sancynayo barnaamijka ka hortegidda wasakheynta badda, Wasiirka Kalluumaysiga & Gaadiidka Badda wuxuu dib u fiirin ku sancynayaa, go'aanna ka gaarayaa talada neelmarinta Protocolka "MAARPOL", loona yaqaano "PROTCCCL 1978" ee ku saabsan Xeerka Caalamiga ee ka hortegidda wasakheynta ka timaada maraakiibta ee 1973 London laguna dejiyey London 2da November, 1973.

3. Mar haddii uu hirgalo barnaamijka, dadka si kas ah ugu xadgudba Xeer-nidaaniyaha loo soo saaray ujeeddadaas, xadgudub kasta waxay ku mureysanayaan ganaax aan ka badnayn Shs. So. 1.000.000 ama xarig aan ka badnayn Shan (5) sano ama labada ba. Maalin kasta oo uu xadgudub ku sii socdo, waxaa loo qaadnayaa inuu yahay xadgudub cusub. Haddii uusan jirin xeer-nidaaniye ku saabsan ujeeddadaas, ciqaabta kor ku qoran waxaa lagu dabbaqayaa maraakiibta ha ahaadeen kuwo wata Calan Soomaliyeed ama Calan Shisheeye, oo lagu helo dembiga daadinta wasakhda neel kasta oo ka mid ah soohdinta biyaha Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaliya.

255
253

4. Qofka lagu helo dembiga wasakheynta badda ee ku
saabsan Qaybtan, loona oggola inuu koobo nas'uuliyaddiisa
la xiriirta khasaaraha ka dhasha xadgudubkaas.

QOEDDHO GUUD

QODOLKA 202-AAD

CIQAAB GUUD

Xadgudubyada aan lagu tilmaanin sharcigan oo lagu helo
qof kasta, waxaa lagu ciqaabayaa gacax aan ka yarayn
2,000 kana badneyn Sh.So. 2,000,000/=.

QODOLKA 203-AAD

XEER NIDAAMIYEEYAASHA

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaliya

isagoo dhogeystay talada Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysi-
ga iyo Gandiidka Dadda wuxuu soo saarayaa Xeer Nidaamiya-
yaasha lagu xusay Sharcigan iyo kuwii kale ee loo baahdo
oo lagu hirgelinayo sharcigan.

QOEDDHO GUUD

X E E R I K

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

256
(25)

QOQCEBKA 204-AAD

B U R I N

Sharciga Dadda ee Ir. 1 ee 21. 2. 1959 iyo Sharci
kasta ama Xeer Nidaamiye kasta oo ka horjocda ama aan
la socon karin Sharcigan waa la buriyey.

QOQCEBKA 205-AAD

DHAQAN GAL

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa lixdan maalmood
laga bilaabo taariikhda Sharcigan lagu faafiyo faa-
finta Rasniga ee Dawladda Jamhuuriyadda Dimuqradiga
Soomaaliya.